

# Su'aalo iyo jawaab ku saabsan sariir ku kaadinta

Soomaali – somaliska


*Buugan yar waxa soo saaray Maxadka Iswiidhishka  
ee isku kaadinta habeenkii*



# Intee in leeg ayay caadi tahay sariir ku kaadintu?

Caruurta badankooda waxay qallayl noqdaan inta da'da 2-3 sanno, caadi ahaana ka hor xilliga maalinti marka la barbardhigo xilliga habeenkii. Marka ilmo ka dib da'da 5 sanno jirka weli ku kaajayo hurdada, waxa lagu magacaabaa sariir ku kaadinta ama kaadinta habeenkii. Qiyaastii shantiiba mid ka mid ah 5-sanno jirka iyo toddobadiiba mid ka mid ah 7-sanno jirka waa sariir ku kaadiyayaal. Tirada wiilasha ee dhibaatan leh waa labanlaab marka loo eego gabdhaha. Gudaha da'da u dhaxeysa 13-19 sanno waxay sariir ku kaadintu ku dhacdaa boqolkiiba 1-2.





## Maxaa sababa sariir ku kaadinta?

Weli ma cadda sababta qayb ka mid ah caruurta iyo dadka waaweyn ee leh isku kaadintu aanay u kicin marka ay qabato kaadi. Laakiin baaritaanku wuu sii horumarayaa oo sanadihi ugu dambeeyay aqoontayadu aad ayay kor ugu kacday. In waxyaabo lagala dhaxlo ay qayb ka yihiin waa arrin si aad ah loo ogyahay. Qiyaasti boqolkiiba 75 ka mid ah caruurta sariirta ku kaadida waxa dhinacooda ka jira sariir ku kaadiyayaal goyska ah.

Sariir ku kaadintu qiyaasti marnaba maaha wax ku xidhan dhinac maskaxiyah ah. Caruurta ku kaadida sariirta dhab ahaanti waa sida caruurta kale, laakiin dhibaato ayaa soo bixi karta ay sabab u tahay sariir ku kaadintu. Caruurta waxay ka wel-welaan inay u sheegaan saaxiibada oo ma ku dhiiradaan tusaale ahaan inay la soo seexdaan, waxay ka caga-jiidaan inay raacaan safarada dugsiga ee meel kale la soo seexanayo, i.w.m. Tani waxay keeni kartaa isku kalsooni liidata.

Waa caadi in waalidiintu ay u arkaan in caruurtooda sariirta ku kaadida ay si qoto dheer u seexdaan marka la barbardhigo kuwa kale. Baaritaanku wuxu muujiyay inay yihiin kuwo kicintoodu ay aad u adagtahay, laakiin hurdadu ay sideeda kale tahay caadi. Waxa kale oo la arkay inay badanaaba iyagu leeyihiin kaadi mareeno caafimaad qaba oo qiyaasta kaadi haysta iyo faaruqinta kaadi haystuba caadi tahay.


Balse qayb ka mid ah caruurta ku kaadida sariirta waxay sameeyaan kaadi dheeraad ah habeenkii marka loo eego caruurta kale ee ay isku da'da yihiin iyo weliba mararka qaarkood in ka badan marka loo eego waxay iyagu sameeyaan xilliga maalinti oo dhan. Sabab dheeraad u ah sariir ku kaadinta waxay ahaan kartaa in kaadi-haystu ay u shaqaynayso qaab khalad ah. Ilmuhu wuxu markaasi lahaan karaa dhibaato kaadineed xitaa maalinti iyo mararka qaarkood xitaa infekshano kaadi mareenka ah oo soo noq-noqda.

# Waa kuwee baaritaanada dhakhtarku sameeyo?

Caruurta sariirta ku kaadidaa waa inay la kulmaan dhakhtar ama dhakhtarka kaadi mareenada/ kalkaaliso caafimaad takhasus ah ka hor intaan la bilaabin daaweynta. Dhakhtarka ama kalkaalisada caafimaad ayaa wax ka ogaanaya xaqiiqda ku saabsan horumarka ilmaha iyo wixi xanuuno ah ee jiri kara, haddii ilmaha calooshu taagantahay, haddii ay jiraan wax dhibaatooyin ah dhinaca kaadinta ee maalinti ama arrimo kale kuwaas oo sabab u noqon kara isku kaadinta habeenkii. Intaas ka dib waxa la samaynayaa baaritaanka jirka oo caadi ah waxaana la hubinayaa shay-baarka kaadida.

# Maxaa qofku iskii u samayn karaa?

Ka hor da'da lix jirka badanaaba ma la daweyyo sariir ku kaadinta sababtoo ah qaar badan ayaa si kadis ah u noqda kuwo aan isku kaajin. Waxa kale oo jirta in isku kaadintu ay dhif iyo naadir tahay dhibaato gudaha da'dan. Waxa muhiim ah in la cadeeyo in ilmaha khaladkiisa aanay ahan in isaga/iyadu isku kaadiyaan. Furaash aan jilicsanayn kaas oo fudud in la maydho ayaa hawsha u sahli kara qoyska ama waxa la heli in loo qoro karaa go'a ilaalinta oo leh awood nuugitaan oo weyn. In la kiciyo ilmaha hal mar xilliga habeenki, tusaale ahaan marka waalidiintu ay sii seexanayaan waxay keenki kartaa in ilmuhu qallayl ahaado. In ilmaha laga joojiyo cabitaanka ma daweyso sariir ku kaadinta, laakiin waxa caqli wanaag ah in hoos loo dhigo tirada cabitaanka ee habeenkii, gaar ahaan ka hor xilliga seexashada. Xilliyo cunto oo joogto ah, caadooyin kaadi iyo saxaro oo xilliga maalinti ah waxay ilmaha u sahlaan inuu noqdo qallayl xilliga habeenkii.



# Waa kuwee qaababka daaweyn ee jiraa?

Waxa jira oo ugu muhiimsan laba qaab oo loogu talagalay daaweynta sariir ku kaadinta – qaylo-dhaan iyo dawo.

## Daryeelida qaylo-dhaanta

Qaylo-dhaanta isku kaadinta waa daryeelid lahaan karta wax-tarid fiican dhinaca sariir ku kaadinta. Balse waxaa shuruud ah muujinta xiise iyo adkaysi labadaba oo ka timaada caruurta, qoyska iyo daryeelayaasha dhakhtar/kalkaaliso caafimaad/dhaktarka kaadi mareenka. Qaabkan waxa la rumaysanyahay inuu maskaxda ka caawiyo inay xitaa xilliga hurdada ay fahanto dhambaalada kaadi-haysta si ilmuhu hurdada uga kaco una kaco soo kaadinta ama isu hayo ilaa iyo aroortii.

Qaylo-dhantu waxa kaga shaqaysiisa dhibicda kaadida ee ugu horeysa. Markaasi micnaheedu waa in ilmuhu joojiyo kaadinta, kaco/la kiciyo, istaago, tago musqusha oo halkaasi ku soo dhammaysto kaadinta.

Bilowga daaweyntan waxa ilmaha ku adkaan karta in la kaco oo qalabkan wuxu kiciyaa qoyska intiisa kale, laakiin marka wax kastaaba shaqeeyaan habeenada qallaylka ah ayaa noqda kuwo caadi ah. Qalabkan waxa la haysanayaa ilaa ilmuhu lahaanayo laba toddobaad oo dhan oo qallalnaa ah. Markay dhacdo inay arrintani soo noqoto waxa lagu talinayaa wareeg daaweyn oo cusub.



## Daawo

Tiro sannado ah gudahood ayaa tiro badan oo daryeelid daawo ah la tijaabiyay. Maanta waxa jira dawooyin lagu iibsado warqad uu dhakhtar qoray oo loo isticmaalo dhinaca sariir ku kaadinta.

Mid ka mid ah kuwaas waxay aad ula mid tahay dheecaanka jirka ee "vasopressin" oo si la mid ah ayay awood ugu leedahay joojinta soo saarka kaadida ee xilliga habeenkii. Daawada iyo qaylo-dhaanta waa la isku dari karaa haddii wax-tarid ku filan aan laga gaadhin mid ka mid ah doorashooyinkan. Daaweynta waxa loo siin karaa si joogto ah habeen kasta ama waxa la siin karaa oo keliya xilliyo gaar ah sida marka ilmuhu la soo seexanayo saaxiibo ama u baxayo joogitaan safarada dugsiga ee meel kale la soo seexanayo.



# Soo koobid

Caruur badan ayaa leh dhibaataada sariir ku kaadinta xilliga da' da dugsigu. Badanaaba waxa jirta dhibaato kaadi gudaha qaraabada. Sariir ku kaadinta habeenki waa la daweyn karaa waana in la daweyyo. Waxa jirta caawimaad la helayo oo loogu talagalay dhamaan.

Daryeelida caadi ahaan waa qayl-dhaanta iyo daawo. Da' da ugu haboon ee la bilaabi karaa waa qiyaasti 6 jirka. Ilmaha iyo qoyska ayaa si wada-jir ah ula dooranaya dhakhtarka daaweynta ugu haboon ee arrin kasta oo gaar ah. Haddii tani aan laga gaadhin guul, u baddel qaabka kale ama isku dar labadaba.

Ha is-dhiibin haddii qaylo-dhaanta ama daawadu midnaba aanay yeelan wax-tarid:

- Qiyaasti boqolkiiba 15 ka mid ah sariir ku kaadiyayaasha ayaa kuwo qallalan noqda sannad kasta.
- Wareeg daaweyn mar dambe ah ayaa si fiican u yeelan kara wax-tarid.
- Gudaha xilligan waxa kalkaalisada caafimaad ee degmada laga heli karaa qalab la adeegsado iyo sidoo kale go'a ilaalinta.
- Qaabiladaha takhasuska ah ayaa soo bandhiga daaweynyo dheeraad ah.

Waxa muhiim ah in aan marnaba la ciqaabin ama la dhaleecayn ilmo ku kaaja sariirta. Taas baddelkeeda waa in ilmaha lagu ammaano ka qayb qaadashadiisa daaweynta. In la isku dayo xoojinta isku kalsoonida ilmaha waxay ilmaha u sahlaysaa in la noqdo qallayl.

Booqo xitaa: [www.tornatt.nu](http://www.tornatt.nu) och [www.svenskaenures.se](http://www.svenskaenures.se)



[www.tornnatt.nu](http://www.tornnatt.nu)  
[www.svenskaenures.se](http://www.svenskaenures.se)



*Su'aalo iyo jawaabo ku saabsan sariir ku kaadinta waxay ku jiraan gudaha taxanaha qoraalka Maxadka Iswiidhishka ee isku kaadinta habeenkii (SEA).*

*Maxadka Iswiidhishka ee isku kaadinta habeenkii waxa la aasaasay 1993 kaas oo ah koox khabiir iyo warbixinba oo loogu talagalay su'aalaha ku saabsan isku kaadinta iyo dhibaatooyinka isku kaadinta ee dhinaca caruurta iyo dhallinyarada. Xildhibaanadu waxay si guud u matalaan dhakhtarka caruurta, daryeelka caafimaadka dugsigu, baxnaaninta/neerfayaasha caruurta, dhakhtarka takhasuska keliyaha, bdi, cilmiga xubnaha taranka caruurta, cilmi-nafsiga caruurta, cilmiga xubnaha taranka dadka waaweyn, cilmiga neerfayaasha iyo keliyaha, daaweynta isku kaadinta iyo cilmiga sida ay daawooyinku u shaqeeyaan.*

Ledamöter i SEA, maj 2014

Bruno Hägglöf, Barn- och ungdomspsykiatri, Umeå Universitet, Umeå

Sven Mattsson, Barn- och ungdomssjukhuset, Universitetssjukhuset, Linköping

Trygve Nevéus, Njur- och urinvägsenheten, Akademiska Barnsjukhuset, Uppsala

Anders Arner, Avd för fysiologi och farmakologi, Karolinska Institutet, Stockholm

Anna-Lena Hellström, Uroterapiavdelningen, Drottning Silvias Barn- och ungdomssjukhus, Göteborg

Gunilla Glad Mattsson, Barn- och ungdomssjukhuset, Universitetssjukhuset, Linköping

Maria Herthelius, Nefrosektionen, Barnens sjukhus, Karolinska Universitetssjukhuset Huddinge, Stockholm

Annika Lindgren, Skolhälsovården, Utbildningsförvaltningen, Malmö

Sivert Lindström, Institutionen för klinisk och experimentiell medicin, Hälsouniversitetet, Linköping

Göran Läckgren, Barnkirurgiska kliniken, Barnurologiska sektionen, Akademiska Barnsjukhuset, Uppsala

Lars Malmberg, Urologkliniken, Universitetssjukhuset, Lund

Lars Engstrand, Institutionen för MTC, Karolinska Institutet, Stockholm

Erik Persson, Avdelningen för fysiologi, Institutionen för medicinsk cellbiologi, Uppsala Universitet, Uppsala

Ulla Sillén, Barnkirurgiska kliniken, Barnurologiska sektionen, Drottning Silvias Barn- och ungdomssjukhus, Göteborg

Hans Smedje, BUP-verksamheten, Stockholms Läns Landsting, Stockholm

Arne Stenberg, Barnkirurgiska kliniken, Barnurologiska sektionen, Akademiska barnsjukhuset, Uppsala

Damien Brackman (adjungerad), Barneklirikken, Haukelands Universitetssykehus, Bergen, Norge

Søren Rittig (adjungerad), Børneafdeling A, Århus Universitetshospital, Skejby, Danmark

Jens Peter Nørgaard (hedersmedlem), Urologkliniken, Universitetssjukhuset, Lund

*Buugan yar waxa lagu daabacay caawimaad kaalmo dhaqaale oo ka timid*

**FERRING**  
PHARMACEUTICALS

Ferring Läkemedel AB, Box 4041, 203 11 Malmö  
Tel: 040-691 69 00. [info@ferring.se](mailto:info@ferring.se), [www.ferring.se](http://www.ferring.se)